

**MA KA XAJIN KARAA
QOF KALE**

الحج بالنيابة

WAXAA DIYAARIYAY :

MAXAMED AXMED CILMI

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

Su'aal :

ma ka xajin karaa qof kale, sida waalidiintaya oo kale, sideense uga xajin karaa?

Jawaab:

Haa way banaan tahay in aad ka xajido qof kale ciduu doonaba ha ahaadee. Waxaana lagama maarmaan ah arimahan soo socda:

- 1- qofku marka uu ka xajinayo qof kale haba ahaadaan waalidkiisee waxa la raba in uu isagu hore u gutay xajkiisii lagu lahaa.
- 2- qofka laga xajinayaa waa in uu yahay qof dhintay ama aanan awoodayn in uu xajka tago, tusaale ahaan waxa ku dhacay xanuun uusan ka bogsan Karin, ama ma awoodo uma leh in uu safar galo.
- 3- sidoo kale haduu uu maal uu ku xajiyo waayay oo uu dhintay , cidna waajib kuma aha in ay ka xajido, laakin waxa looga xajin karaa si tabaruc ah.
- 4- Qofka waxa looga xajinayaa sida caadiga ah ee qof walba u guto xajkiisa, kaliya marka uu xidhanayo ayuu odhanayaa: (LABAYKA XAJJAN CAN) magaca qofkaas kale ayuu ku dhawaaqayaa. Midaas oo

macnaheedu yahay waxaan ka xajinayaa qofka magiciisu yahay hebel.

5- Raga iyo haweenku midba midka kale wuu ka xajin karaa.

6- Suurto gal maaha in uu hal mar yidhaahdo xajkan waxa aan u niyoonayaa naftayda iyo aabahay ama hooyaday. Laakiin waxaa u banaan in uu qof ka xajiyo qofna ka cumraysto.

7- Arintan waxa u daliil ah: saxaabi ayaa waydiiyay nabiga salalahu calayhi wasalam.

(RASUULKII ILAAHAYOW XAJKII AYAA SOO GALAY, AABAHAYNA WAA QOF WAYN OO MA AWOODO IN UU FUULO XAMUUL, MA KA XAJIN KARAA? NABIGU – SALALAHU CALAYHI WASAL- WAXA UU KU JAWAABAY: HAA)

WABILAAHI TAWFIIQ.